

Mabaadi'ida aasaasiga ah ee ODDS ee codsiyada miisaaniyadeed ee 2027–29

22-ka Luulyo, 2026

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS) wuxuu qabtay 18 kulan oo bulsheed billaha Abriil iyo Maajo 2026. Waxaan si shakhsi ah iyo Zoom-ka ah ula kulanay dadka reer Oregon ee ka kala yimid daafaha gobolka. Sahan ayaan sidoo kale ku wadaagnay onlaynka.

Dadka ayaan wax ka weydiinay adeegyadooda naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD) iyo waxa aadka ugu muhiimsan marka aan go'aanno miisaaniyadeed gaareyno. Annagoo adeegsanayna ra'yi-celin bulsho, waxaan diyaarinay 12 mabaadi'i oo hagaya codsiyada miisaaniyadeena.

Bishii Juun 2026-kii, waxaan ku codsanay rayi-celin ku saabsan mabaadi'ida qabyo-qoraalka ah. Annagoo adeegsanayna ra'yi-celintan naqtiin ayaan ku samaynay mabaadi'ida. Werinta kamadambaysta ah waa tan hoose:

Mabaadii'daan 13-ka ah ayaa hagi doona codsiyadeena miisaaniyadeed ee 2027–29. Sharci-dejinta Oregon ayaa gaaraan go'aannada miisaaniyadeed ee kamadambaysta ah.

Waad ku mahadsan tihiin dhammaan dadkii ra'yi-celinta nala wadaagay inta ay hawshan socotay oo dhan.

Mabaadi'ida aasaasiga ah ee qorsheynta miisaaniyadeed ee ODDS

Go'aannada khuseeya adeegyada waxay ka bilaabmaan qofka.

- **Ku bilow qofka** — Taageeradu waa inay ka bilaabataa qofka, ma ahan inay ku bilaabato waraaqo ama xeerar.
- **Qof kasta ayaa haga noloshiisa gaarka ah** — Qof kasta wuxuu doortaa yoolalkiisa, sida uu dadka ula xiriiro, iyo waxa muhiimka u ah. Dadku dooqyo u gaar ah ayay leeyihiin, xitaa kuwa adag.
- **Dejiso qorshayaal ku habboon qof kasta** — Go'aannada iyo habraacyadu waa inay la jaanqaadaan baahiyaha, waxyaabaha uu jecel yahay, qaabka wadaxiriirka, iyo sooyaalka qof kasta. Qorsheyaasha taageeradu waa in hormarka iyo isbeddelka qofka la jaanqaadaan.
- **Ilaali sharafta iyo ikhtiyaarka** — Adeegyadu waa inay ka caawiyaan dadka inay mas'uul ka ahaadaan noloshooda oo ay doortaan xulashooyinkooda.

Taageer madax-bannaanida dadka.

- **Adeegyada naqshadeynta si kor loogu qaado madax-bannaanida** — Ka caawi dadka inay u madax-bannaanaadaan sida ay rabaan. Maamulayaasha kiisaska iyo qoysasku ayaa adeegsada go'aan qaadasho la taageero si ay uga caawiyaan dadka u gaaraan go'aano u gaar ah.
- **Sii qof kasta macluumaad cad** — Hubi inay cod dhab ah ku leeyihiin go'aannada. Waxay doortaan cidda ka caawinaysa inay fahmaan isbeddellada.
- **Taageer shaqaalaha si ay si fiican ugu taageeraan qofka** — Hawl-wadeeno xooggan, la taageero, la tababaray, oo la isku halleyn karo ayaa ka caawiya dadka inay noqdaan kuwo madax-bannaan. Kuwa isku-dubarida adeegyada ee bixiya taageerada waxay saameyn toos ah ku leeyihiin caafimaadka, badqabka, kobaca, iyo farxadda dadka.

Sare u qaad xuquuqaha madaniga ah ee bulshada qabta I/DD iyo qiyamyada aasaasiga ah.

- **Taageer xuquuqda ku dhex noolaanshaha bulshada** — Dadku waxay xaq u leeyihiin inay ku dhex noolaadaan meel aan xaddidnayn oo dad isku dhafan leh. Oregon dib ugu laaban mayso xarumo.
- **Ka dhabe qiyamyada aasaasiga ah** — Ka mid ahaanshaha kooxo, xaqsoorka, sharafta, iyo ka mid ahaanshaha bulshada waa inay hagaan adeegyada oo dhan.

Helitaan caddaalad leh oo loo siman yahay oo loogu talagalay dadka leh kartida iyo dhaqamada kala duwan.

- **Kula kulan dadka meesha ay joogaan** — Adeegyadu waa inay ku habboonaadaan dhaqanka, luuqadda, aqoonsiga, goobta, iyo baahiyaha dhaqaale ee dadka.
- **Bixi taageero luuqadeed oo ixtiraam dhaqamada kala duwan** — Tani waxaa ka mid ah in la helo turjubaano, agab la turjumay, iyo shaqaale fahma dhaqanka qofka, iyo gelinta waqti dhisidda kalsoonida.

Wadaxiriir cad, furan oo daacad laga yahay si loo dhiso kalsooni.

- **Kaqaybgeli dadka go'aannada** — “Waxba nagma khuseeyaan wixii aan ra’yi ku lahayn” waa inay hagto dhammaan go'aamada.
- **La wadaag macluumaadka goor hore** — Qoysasku waxay rabaan warar cad iyo cod dhab ah marka la gaarayo go'aannada, gaar ahaan wixii khuseeya miisaaniyad dhimis.
- **Ka dhig macluumaadka mid la heli karo** — Fududeynta wadaxiriirka iyo geedi-socodyada ayaa caawiya qof walba.

- **Furfurnow oo wadaag xaduudaha iyo jadwalada waqtiyeed** — Sharra x sababta go'aannada loo gaarayo iyo sida ay u saameeyaan dadka. U sheeg dadka waxa ay filan karaan iyo goorta ay filan karaan.

Xooji taageerada laga helo qoyska, asxaabta iyo bulshada.

- **Taageer saaxiibtinimada iyo xiriirka** — Cilaaqaadyada iyo nashaadyada bulsheed waxay dadka ka caawiyaan inay dareemaan farxad ayna qayb ka yihiin.
- **Ka dhigo nolosha bulsheed mid suurto gal ah** — Dhammaan nidaamyadu waa inay ka taageeraa dadka inay ku biiraan nashaadyada, shaqeeyaan, ciyaaraan oo kooxo ka mid noqdaan.
- **Xooji taageerada dabiiciga ah** — Ka dhig taageerada qoyska, asxaabta iyo bulshada mid, xooggan.

Ku dhowr ammaanka dadka guryahooda iyo bulshooyinkooda dhexdooda.

- **Adeegyada guriga iyo bulshada dhexdooda lagu baxsho ayaa mudnaanta koowaad leh** — Waxay wanaajiyaan tayada nololeed waana kuwa ugu badqabka badan uguna kharash yar.
- **Ka caawi dadka inay ku noolaadaan halka ay doortaan** — Siyaasaduhu waa inay ka taageeraan dadka inay ku noolaadaan goob ku habboon.
- **Taageer nolosha bulshada** — Adeegyada ka caawiya dadka inay ku dhex noolaadaan, ka shaqeeyaan, oo ku biiraan bulshadooda ayaa muhiim ah. Ma ahan kuwo ikhtiyaari ah.
- **Ka mid ahaanshaha bulshada waxay ka caawisaa dadka inay ammaan iyo caafimaad-qab ahaadaan** — Marka dad badani ay qof yaqaanaan, waxay u badan tahay inay ogaadaan haddii ay wax ka khaldan yihiin. Inuu

lahaado saaxiibo iyo xiriiro badan waxay sidoo kale qofka siinaysaa dad badan oo uu la hadli karo oo ka baxsan nidaamka adeegga ee I/DD.

- **Shaqooyinku waxay kordhiyaan madax-banaanida** — Kasbashada lacag iyo ka mid ahaanshaha bulshadu waxay dadka siisaa dooqyo iyo xakamayn nololeed oo badan.

Badqabka iyo fayyo-qabka ayaa mudnaanta leh.

- **Ilaali caafimaadka iyo badqabka** — Dadku waa inay helaan adeegyo ka ilaaliya xadgudubka iyagoo kor loo qaadayo sharaftooda ka badqabka khatarta iyo fayyo-qakooda shucuureed.
- **Kahortag xasaradaha** — Adeegyadu waa inay ahaadaan kuwo xassilan oo dhawrsoon.

Taageer dadka goor hore si looga hortago xasaradaha dhaca goor dambe.

- **Caawi xilli hore si aad uga fogaato dhibaatooyinka waaweyn** — Taageerada hore waxay ka hortagtaa dhaawacyada maskaxeed oo lacag ayay kuu dhaqaalaysaa goor dambe.
- **Taageer dadku inay noqdaan kuwo madax-bannaan intii suurtagal ah** — U qaado inay karti leeyihiin. Ka faa'iidayso fursadda aad wax ku bari karto halkii aad adigu wax u qaban lahayd. Abuur dhaqan aan ku hubinno in adeegyadu ay horumariyaan madax-bannaanida dadka.
- **Iska ilaali jarida adeegyada goor hore** — Jaritaanka adeegyada carruurta, taageerooyinka habdhaqanka iyo saacadaha daryeelka lagu baxsho guriga dhexdiisa waxay keenaan kharashyo badan oo muddo-dheer ah iyo xasillooni-darro.

U isticmaal lacagaha si mas'uuliyad iyo caddaalad leh.

- **La soco lacag isticmaalka** — Kahortag khiyaanada iyo beeldareynta iyadoo la hubinayo bixiyeyaasha, hay'adaha iyo kharashaadka.
- **Marka hore jar beeldareynta maamulka** — Ku bilow kuwa aan waxtarka lahayn, ee ma aha taageerooyinka tooska ah.
- **U isticmaal lacagaha si caddaalad leh** — Diiradda saar go'aannada khuseeya tayada iyo xaqsoorka, ee ma aha oo keliya kharashka ama munaasabka.

Ku wadashaqaynta nidaamyada oo dhan.

- **Jooji ku wadashaqaynta nidaamyada aan isku xirnayn** — Qoysasku way ku dhibtoodaan marka nidaamyada I/DD, kuwa caafimaadka, dugsiga iyo kuwa caafimaadka dhimirka aysan wadashaqaynin.
- **Wadashaqeeya** — Ku wadashaqaynta kooxaha nidaamyadani dhexdooda waxay dhintaa caddaadiska, culayska shaqada kharashaadka iyo farqiga aan waxyeellada leh ee ka dhex jira adeegyada.
- **Wadaag mas'uuliyadda** — Baahiyaha dadku badanaa intabadan ka gudbaan nidaamyo badan. Adeegyada I/DD ma dabooli karaan baahi kasta.

Waraaqo yar, iyo waqti badan oo loogu talagalay dadka.

- **Yaree waraaqo buuxinta** — Foomamka dhaadheer, qiimeynada soo noqnoqda iyo tallaabooyinka jahawareerka leh waxay waqti ka lumiyaan taageerada dhabta ah.
- **Sax xeerarka jahawareerka leh** — Xeerarka aadka u badan, hababka jahawareerka leh iyo farriimaha isku dhafan ayaa ku adkaynaya qoysaska inay ku kalsoonaadaan nidaamka.

- **Ka dhig wax walba kuwo fudud** — Isticmaal tiknoolajiyadda, wadaxiriir cad iyo habab fudud. Hel qaabab aad uga dhigto habraacyada kuwo sahlan.

Raadi xalal hal-abuur leh oo dadka siiya dabacsanaan iyo xulashooyin.

- **Sii dadka dooqyo dheeraad ah** — Kordhi dabacsanaan ay dadku ku isticmaali karaan saacadaha adeeggooda iyo agabkooda si ay u gaaraan yoolalkooda.
 - **Oggolow ikhtiyaaro kala duwan** — Hal hab kuma habboona qof walba. Xeerarka waa inay ku habboonaadaan nolosha dhabta ah.
 - **Taageer fikradaha cusub** — Xalalka hal-abuurka leh waa la soo dhaweynayaa marka ay ku saleysan yihiin rabitaanka iyo baahiyaha qofka.
-

Waxaad dukumintigaan ku heli kartaa si bilaash ah isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad ku dooneyso. Iimayl ku soo dir dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.